GOSEDJUR

en mjuk utställning i en hård tid

Om utställningen på somaliska

Ku saabsan badhiga oo af soomaali ah

Gosedjur (xayawaanada jiljilicsan ee boobalooyinka/madaamaadah ah) – Badhig jilicsan iyo wakhri adag
28-ka bisha maajo (maj) 2016 – 17-ka bisha sibtambar (september) 2017

Ku soo dhawoow inaa aad keento noocyo kala duwan ee xaywaanada yar yar ee jilicsan ee boobnbalada/madaamadaha ah ee caruurtu ku ciyaaraan/dheelaan (gosedjur) oo leh midabo kala duwan, qaabab kala duwan iyo qiyaaso ama cabiro kala duwan! Inta badan xawaanada jiljilicsan ee yaala meeshan dhexdeeda waxaa noogu deeqay ama na soo deymiyey/amaahiyey caruur iyo dad waaweynba. Badhiga waxaa jira goob loogu talo galay in lagu ciyaaro, waxaa sidoo kale lagaga hadli karaa su'aalo qoto dheer. Qoraalkani wuxuu ku siinayaa hordhan ku saabsan bandhiga iyo sharaxaad ku saabsan waxaa aad ku arki doonto ama sameyn doonto bandhiga.

Maxaa ay xayawaanada jiljilicsamee ee boonbalada/madaamada jiljilicsani (gosedjuren) nala sameeyaan anaka?
maxay sameeyaan in aan dareeno? Wareysi muqaal ah oo ay bixisey Kerstin Uvnäs Moberg oo ah dhaktrad iyo barre dhiga maadada barshada dhismaha jidhka (fysiologi) ayaa waxaa ay kaga sheekeyneysaa waxa ku dhaca jidhka marka marka aad hab siiso qof aad jeceshahay, ama aad u salaaxdo xayawaanka ama aad qabato xayawaanka jiljilicsan ee boonbalada/madaamada ah (gosedjur). Waxaa dhacaysa in uu jidhka kuf ido dheecaan lagu magacaabo oksitosin (oxytocin) Taas oo keeneysa in aad dareento xasilooni iyo deganaansho isla markaana aad dareeno caafimaad. Kor u qaad oo hab sii boonblada/madaamada (nallen). Maxaad dareemeysaa?

Taarikhda boonbalada/madaamada (Nallen)
Boonbalada/madaamada oorsada/madax kutiga (nallebjörnar) waxaa la bilaabey in lagu sameeyo markii ugu horeysey wadamada mareykanka iyo jarmalka (USA och Tyskland) bilowgii qarnigii 1900-naad. Waxaa ay si degdeg ah u noqotey qalab aad caan u ah oo ay caruurtu ku dheelaan/ciyaaran, wiilal iyo gabdhoba. Sandahii 1950-meeyadii ayey caadi noqotey in la siiyo Boonbalada/madaamada oorsada/madx kutiga ah (Nallebjörnar) iyo xayawaanka jiljilicsan ee boobalooyinka/madaamaada ah caruurta ku nool Iswiidhen. Wakhigan aynu maant joogno intooda badan caruuraha ku nool wadanka Iswiidhen waxaa ay haystaan xayawaanka jiljilicsan ee boobalooyinka/madaamaada ah (gosedjur) kuwaas oo leh midabo iyo qaabab kala duwanba.

MÖLNDALS STADSMUSEUM
www.museum.molndal.se/sprak

Xayawaanka jiljilicsan ee boobalooyinka/madaamaada ah (gosedjur) oo wax caawiya
Hawl wadeenada badbaadada xeebaha, dab damiska, ciidanka booliiska iyo ambalaasyada waxaa ay wataan boobalo jilicsan oo lagu magcaabo maskotar taas oo lagu sasabo caruurta (iyo dabcan xitaa mararka qaarkood dadka waaweynba) ee ay la soo daristo marxalad adag. Meelaha lagu daryeelo dadka waayeelka ah waa la isticmaala mararka qaarkood xayawaanka jiljilicsan ee boobalooyinka/madaamaada ah (gosedjur) si loogu dejiyo oo loo abuuro jawi xasiloon. Xayawaanka jiljilicsan waxaa sidoo kale loo isticmaalaa goobaha daryeelka caafimaadka si loola sameeyo caruurta xidhiidh. In lagu dhajiyo sharoota Boonbalada/madaamada oorsada/madax kutiga (en nalle) waxaa ay noqon kartaa hab wanaagsan oo loo barto sida uu isbitaalku u shaqeeyo isla markaana aaney khatar ahen in uu dhakhtar ku baadho.

Boonbalada/madaamada aargoosta (Nallen) sidii calaamad oo kale
Xayawaanka jiljilicsan ee boobalooyinka/madaamaada ah (gosedjur) iyo Boonbalada/madaamada oorsada/madax kutiga (nallen) waxaa sidoo kale loo isticmaalaa marar badan sidii calaamad oo kale marka laga hadlayo caruurta, jaceylka iyo marka laga hadlyo xasiloonida. Waxaa aad ku ariki kartaa xayawaanka jiljilicsan ee boobalooyinka/madaamaada ah (gosedjur) waxyaabo la xidhiidha murugada i farxada labadaba, sida tusaale ahaan marka ilmo caruura la duugayo/aasayo, marka ardeydu qalan jabinayaan ama marka qof siinayo hadyad qof kale si uu ugu muujiyo jacaylkiisa.

Saaxiibka nolasha
Qayb weyn oo ka mid ah waxyaabaha uu ka koobanyahay bandhigu waa xayawaanka jiljilicsan ee boobalooyinka/madaamaada ah (gosedjur) oo ah jacaylka caruur iyo dad waaweynba oo ay deymiyeen/amaahiyeen maxfatka (museet). Xayawaanka jiljilicsan ee boobalooyinka/madaamaada ah (gosedjur) la socdey noloshooda oo dhan oo ilaa maantan yaala.

Dhamaan Boonbalada/madaamada oorsada/madax kutiga ee gaboobey oo jeex jeexan waxa ka mid ah ooku jira labo eey iyo hal daayeer, oo ay na deymisey/amaahisey islaan waayeel ah oo 96 sano jir ah (waxa aad ku arki doontaa sawika iyada oo la jirata xayawaanka jiljilicsan ee boobalooyinka/madaamaada ah (gosedjur)). Waxaa ay la jireen nolasheeda oo dhan islamarkaana mar kasta qiimo wen bey ugu fadhiyeen iyada. Waxaa ay ka sheekeysey: ” Hooyadey waxaa la waayey oo ay ka tagtey gurigayaga markii aan 1 sano jirey dib danbana uma arkin ka hor xaqiijinteydii (konfirmerades) (waa xaflad loo dhigo qofka kiristaanka marka uu qiyaastii qaan gaadho taas oo lagu sameeyo kaniisadda). Aabahay waxaa uu ahaa bad mareen ama bad maax inta badana bada ayuu ku maqnaan jirey. Markaas aniga xayawaanadaas jiljilicsan baa ahaa qoyskeyga rasmiga ah”

Ma lahaan jirtey xayawaan yar oo jilicsan markii aad yarayd? Ma haysataa wali boonbalo/madaamad xayawaan jilicsan oo aad jeceshahay?

Dhowr waxyaabood oo aad ku samayn karto bandhiga:

- Ku fadhiisato jilibka oorsada/mada kutiga boonbalada/madaamada ah (nallen) oo aad isku sawirto
- Kor u qaado oo aad hab siiso aargoosta boonbalada/madaamada ah (nallen). Maxaad ka dareemeysaa jidhka?
- Tegto tamashlaha oorsada/madax kutiga boonbalada/madaamada (nallepicknick) ama xaflad dhalosho oo lagu qabanyo guriga oorsada/madax kutiga boonbalada/madaamada (nallarnas hus)
- Qorto magaca xawaankaaga jilicsan ee boonbalada/madaamada ah (gosedjur) oo aad sudho
- Sawirto xawaankaaga jilicsan ee boonbalada/madaamada ah (gosedjur) oo aad ku dhajiso gidaarka/darbiga
- U dhageysato si degen sheekooyinka ku saabsan xawaankaaga jilicsan ee boonbalada/madaamada ah (gosedjur) ee ka dhacaya gudaha qolka filnika (filmrummet)
- Xidhato direes si aad ugu ekaato xawaan jilicsan oo nool (levande mjukdjur)

Ku soo dhowoor si aan si wadajir ah- yar-yar iyo waawenba ugu qayb qaadano badhiga!

MÖLNDALS STADSMUSEUM
www.museum.molndal.se/sprak